

Badbaadada Xadhkaha Koronta ee Soo Dhaca

Xadhkaha korontada ee soo dhacay aad ayey khatar u yihiin waxayna keeni karaan dhaawac halis ah iyo xitaa dhimasho. Marnaba ha taaban. Badbaadadaada darteed had iyo jeer u qaado in xadhigga korontada ee soo dhacaa uu dabaysan yahay oo raac tilmaamahan:



Isla markaaba wac 911 iyo BED (802) 658-0300.

- Ha ku taaban xadhigga korontada ee soo dhacay gacantaada ama wax kale.
- Ka dheeraw wax kasta oo taabanaya xadhiga korontada ee soo dhacay, sida baabuur, walax, qalab iyo xiitaa qof.
- Ka ilaali carruurta iyo rabbaayadaha xadhkaha korontada ee soo dhacay
- Baabuur ha dulmarin xadhigga korontada ee soo dhacay.

Maxaa la sameeyaa haddii xadhigga korontada ee soo dhacay uu taabto gaadiidkaaga?

Haddii aad kujirto gaadiidkaaga oo uu taabto xadhigga korontada ee soo dhacay, si aad u badbaado raac tilmaamahan:

- Isla markaaba wac 911.
- Gaadhiga kujir. Gaadiidka iyo dhulka ku hareeraysan waxa dhici karta inay danabaysan yihiin kaasi oo aad u khatar badan.
- Hoonka garaac, daaqaddana deji, oo caawimana dalbo.
- Dadka kale u sheeg inayna kuu soo dhawaan. Qofka taabta gaadhiga ama dhulka si xun ayuu u dhaawacmi karaa.
- Sug ilaa waaxda dabka, bilayska, ama shaqaalaha tabobaran ee BED kuu sheegaan inaad ka soo bixin karto baabuurka kahor intaanad gaadiidka ka soo bixin.

Maxaa la sameeyaa haddii gaadhigaagu taabto xadhigga korontada ee soo dhacay oo dabna bilawdo?

Haddii aad gaadhigaaga gudaha ugu jirto oo uu taabto xadhig koronto oo soo dhacay oo dabna kaco, raac tallaabooyinkan:

- Iska saar dharka dabacsan.
- Ha ku taaban gaadhiga iyo dhulka meel jidhkaaga kamin ah isla markaas. Danabka ayaa dhixmari kara jidhkaaga oo isla markaana ku dili kara.
- Gacmahaaga dhinacyadaada ku hay oo ka bood gaadiidka adigoon taaban, si aanad u taaban gaadiidka marka cagahaaga dhulka ku dhacaan. Labada cagood dhulka mar wada dhig.
- Labada gacmood isku-hay oo iska qallooci gaadiidka adiga oo aan cagahaaga qaadayn.